



Cinwaanka nagala soo xiriiri karo:
213 Camberwell Road
London SE5 0HG

Tel: 020 7703 4442
Fax: 020 7703 8393

E-mail: mlcrs213@googlemail.com
Web: www.mlcrs.co.uk

Tyubka iyo tareenka noogu dhow:

Buses: 12, 40, 35, 42, 45, 68, 468,
176, 171, 148

Underground & Rail Elephant &
Castle, Oval Denmark Hill, Queen's
Road (Peckham) & Peckham Rye
Lambarka Diiwaangelinta No.
1078005

Last updated: September 2009



Soomaali - Somali

**Adeegyo la-talin iyo xog-siin
madax-bannaan, lacag la-aan ah
Waxaan ku Hadalnaa Afkaaga**

MAXAAN QABANNAA?

Rugta "Multilingual Community Rights Shop" (MLCRS) waxay siisaa talooyin iyo xogag lacag-la'aan ah, madax-bannaan, qarsoodina ah, dadyowga ka soo jeeda jinsiga midabka madow iyo jaaliyadaha ku abtirsada qowmiyadaha laga tiro badan yahay (aqalliyaadka), magangelyo-doonka iyo qaxootiga ee Af-Ingiriisigu uusan ahayn luqaddooda koowaad. Waxaan u adeegnaa dadka ka shaqaysta/ku nool dhammaan degmooyinka London.

AFAFKA WAX LA ISUGU TEBIYO

Dhammaan kulannada iyo xirrada la-talinta iyo xog-siinta waxaa lagu qabtaa luqada dadka nala soo xiriira. Dadka af-Ingiriiska si fashiix ah ugu hadla waa ay na soo mari karaan

Membership & Partnerships: Advice^{UK}, Joint Council for Welfare Immigrants (JCWI), Child Poverty Action Group (CPAG), Southwark Refugee Communities Forum (SRCF), Chinese Community In Britain Forum, Southwark Advice Forum, Southwark Community Legal Services Partnership, Southwark Integrated Advice Network, Community Action in Southwark, BMER Advice Network.

Subscriptions: Refugee Council, Adviser – Citizens Advice, Advisory Centre for Education (ACE), London Advice Services Alliance Advice & Information Management Systems (AIMS), Resource Information Service, UK Advice Finder, Lisson Grove Benefits Program.

Accreditation: Community Legal Services (LSC), Office of the Immigration Services Commissioner (OISC), Advice^{UK} Group Debt Counselling Service.

maalin waliba iyagoon ballan sameysan. Luqadaha la heli karo waxaa ku dhici kara isbeddelo. Ballamo laguma sameysan karo telefon.

Fadlan, na soo mar, telefon nagula soo xiriir ama noo soo qor si aad u ogaatid luqadaha suurtagalka noo ah.

TAARIKHDA RUGTA

Rugta “Multi-Lingual Community Right Shop” (MLCRS) waxaa la abuuray 1994/95. Adeeggan cusub, xiisaha leh, ee la-talinta & xog-siinta wuxuu ka aloosmay wada-shaqayn dhexmartay mashruucyo kala duwan oo loo qoondeeyey dadka laga tiro badan yahay, mashruucyadaasoo taageero ka hela Isbahaysiga Ururrada La-talinta Madaxa-bannaan (Federation of Independent Advice Centres {FIAC})-Advice^{UK}.

Rugta (MLCRS) waxay u fidisaa adeeg la-talin iyo xog-siin lacag la'aan ah, madax-bannaan:

Dadyowga ka soo jeeda aqalliyaadka af-Ingiriisku uusan ahayn luqadooda koowaad.

D adka ka shaqaysta ama ku nool dhammaan degmooyinka London.

XAQA HELIDDA LA-TALIN TAYO LEH

Rugta (MLCRS) waxay ballan qaadeysaa in ay u fidiso, gaarsiisana adeegyo tayo leh dhammaan dadka hawsheeda ka faa'ideysta iyadoo ujeeddadu tahay in ay fursad u helaan horumarinta heerka noloshooda.

La-talinta iyo xog-siintu:

waa adeeg lacag la'aan ah, madax-bannaan; waxaan ku dhiibnaa luqada qofka na soo muteysta; waa qarsoodi.

AAGGA ADEEGYADA LA-TALINTA

Xuquuqda Daryeelka - Hoyga iyo Guri la-aanta - Macaamilka, Dhibaataada Lacageed/Deymanka - Xuquuqda Shaqaaleynta –Waxbarashada - Xuquuqda dadka itaalka-daran (Disability Rights)
Socdaalka (immigration), Jinsiyadda iyo Magangelyada
Daryeelka bulshadeed iyo caafimaad

WAREEJIN

Haddii aan aragno in ayan Xarunteenu kuu dabooli karin kaalmada aad u baahan tahay, waxaan ballan qaadaynaa in aan kugu wareejinno hay'ad ama wakaalad ribix doon ahayn oo kuu qabata adeeg tayo leh.

GARGAARID

Ballan kaddib, waxaan awoodi karnaa in aan u xilsaarno qof ka mid ah dadka iskaa-wax-u-qabso (volunteer) nagula shaqeeya, oo luqadaada ku hadla, in uu ku kaalmeeyo.

Fadlan, telefon nagula soo xiriir, noo soo qor ama na soo mar si aad u ogaatid in gargaarka noocaas ahi uu suurtagal noo yahay.

FUDUDEYN

Dadka itaal la'aanta ah (disable) waa ay u fudud tahay soo gelidda xarunteenna.. Afaf kala duwan waxaa lagu heli karaa xogag, iyadoo ah qoraal, maqal iyo Brille format (farta indhoolayaasha).

U-SINNAASHAHA FURSADAHA

Rugta (MLCRS) himilooyinkeeda waxaa ka mid ah in ay ka tarjunto, wax ka qabato baahida jaaliyadaha, ayna noqoto xarun awoodda in ay u gudbisno xogag wax ku-ool ah dadka af-Ingiriisku uusan ahayn luqadooda koowaad. Mabdaa' u-sinnaashaha fursadaha ayay ku dhaqdaa hawl-qabadyadeeda oo dhan.

Rugta (MLCRS) waa ay aqoonsan tahay in dadyowga ka soo-jeeda aqalliyaadka lagula dhaqmo, bulshada gudaheeda, takoorid ku saleysan isir (race), jinsi (lab/dheddig), asal qabiil ama qowmiyad, itaal-darro caafimaad xag jir, dareen ama maskaxeed, xaaladda qoyseed, da', dabaqadda bulshadeed ee qofku ka tirsan yahay, caqiido diineed, ku kala duwanaanta janjeerka galmada, qabidda cudurka AIDSka ama fayruska HIV.